**Amar lamba. 6 rep**

**Tirtiridda nidaamka xakameynta qiimaha ee hadda jira iyo ansaxinta xeerar cusub oo lagu go'aaminayo qiimaha baahiyaha qiimaynta alaabta iyo adeegaya oo muhimada kowaad leh.**

*Baaqa Ingiriiska lam 24 ee 1943 iyo Amar-sharciga 1944 oo ilaa iyo hadda ka jira Somaliya waxay habeyneysa xadiidada qiimaha alaabta oo dhan oo la beeciyo iyo adeegyada.*

*Kadib markii ay marxaladda Dalku isbedely waxaa lagama maarmaan noqotay in sharcigaasi wax laga beddelo oo loo daayo suuqa xorta ah in uucayimo qiimaha, iyadoo Maamulku uu yeelanayo awooda in wax ka beddelo isagoo tixgelinaya baahidada ummadda qiimaynta alaabta iyo adeegaya oo muhimada kowaad leh.*

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA**

**XOGHAYAHA GUUD**

Kadib marki la arkay dekreetada lamba. 2357 Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 Disember 1952;

Kadib markii la garoowsaday in aan loo baahan yahay in laga gudbo qaabka loo xakameeyo qiimaha iyo in la soo saaro nidaamo ka tarjumaaya xaalada Dalka, si loo gaaro xorrida beeca iyo kala iibsasha badeecada iyo horumarinta warshadeynta iyadoo loo dhowraayo baahidda dadweynaha, badeecooyinka iyo adeega muhima koowad u leh oo lagama maarmaanka ah;

Kadib markii la dhegeystay talada Golaha Dhaqaalaha;

Kadib markii la dhegestay aragtida Guddonka Dhulka;

Kadib markii la dhegestay aragtida Golaha La Talinta ee Qaramadda Madoobe;

Kadib markii la arkay qod. 4 ee dekreetada lamba. 2357 ee Dekreetada Madaxweynaha Jamhuuridda ee 9 Disember 1952.

**WAXAA LA AMRAY**

**Qod. 1**

Waxaa la joojiyey nidaamka xakameynta qiimaha ee hadda jira.

**Qod. 2**

Si loo dhowro danaha dadweyaha, Maamulaha Guud wuxuu kadib markii oo uu la tashto Golaha eek u xusan qod. 3, soo saari kara qiimo taagaan ee badeecada qaarkoo iyo adeegyada muhimka ah iyo adeegyada aan laga maarmi Karin.

Qiimaha la istaajiyey waxaa lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga iyo Keyda Xafiiska Warshadaha, midka Ganacsiga, midka Gudaha Iyo Shaqada.

**Qod. 3**

Waxaa la dhisay Guddiga Qiimeynta oo leh awoodda la talin. Waxaa Guddoon u ah Madaxa Xafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada:

a) Madaxa Xafiiska Arrimaha Gudaha ama qof wakiil o ah;
b) Madaxa Xafiiska Beeraha iyo Xoolaha ama wakiilkiisa;
c) Madaxa xafiiska lacagta qalaad ama Ganacsiga Dibedda ama wakiilkiisa;
d) Madaxa Xafiiska Howlaha Guud ama Isgaarsinta ama qof wakiil ka ah;
e) Madaxa Xafiiska Saadka iyo Gaadiidka am cid wakiil ka ah;

f) Madaxa Xafiiska Guddonka Militariga;
g) Affar wakiil oo metelaaya dadmeeynaha oo uu soo xulay Guddonka Dalka;
h) Affar wakiil oo metelayaa qeybaha dhaqaalaha oo soo carifay Golaha Dhaqaalaha.

Xubnaha lagu tilmaamay xarfaha g) iyo h) waxaa lagu soo magacaabi doona dekreeto ka soo baxday Maamulaha Guud waxayna xilka hayn doonaan ilaa iyo 2 sano.

Waxaan haddii loo bahdo laga soo qeyb gelin karan fadhiyada Golaha Qiimeynta, iyagoo aan lahay wax xaq in ay coddeeyaan ciddii loo garto in ay aqoon u leedahay arrimaha laga hadlaayo.

**Qod. 4**

Aagaga ka baxsan Gobolka Banadir, Maamuluhu wuxu wakiilan kara mar marka qaarkood Guddomiyeyaalka Goboladda si loo xakameeyo qiimaha tafaariqda ee badeecada iyo adegyada muhimka ah iyo adeegyada aan laga maarmi Karin.

Guddomiyaha Gobolka wuxuu la tashan doona Guddonka Dowladda Hoose ee aaga

Qiimaha la go'yey waa in uu Maamuluhu aqbalaa.

**Qod. 5**

Maamuluhu wuxuu fari kaara haddi loo bahdo, in magacaabo guddi tekniko ah, kuwaas oo ay qeyb ka noqon doonaan wakiiladaha qeybaha laga hadlaayo, si ay u saaran warbixin ku saabsan qiimaha noocyada badeecadaha iyo adeegyada.

Maamuluhu wuxuu kadib markii uu ka baarandego maclumaadka ay soo gudbiyeen Guddiga teknika iyo Guddiga Qiimaynta go'aan ka gaari doona qiimaha

**Qod. 6**

Ciddi aan u hoggansaneynin xakameynta qiimaha ee uu Amarkaan xambarsan yahay wuxuu muteysan doonaa ganaax ilaa iyo So 1,500 ama xarig ilaa 1 sano. Marxaladaha ay falalkaasi ay culeyn yihiin waxaa la isu dari doonaa ganaaxa iyo xarigga.

**Qod. 7**

Ilaa iyo xeerkaan ka hirgeli doono waxaa weli jirin doono qiimihi ay hey'adaha dowligu ay amreen oo la xiriira:

a) Isticmaalka biyaha la cabo, kuwa la nadiifiey, kuwa wax lagu dhaqo iyo kuwa la barafeeyo;
b) Isticmaalka korontada ha ahaato midda sida gaarka loo isticmaalo aa midda dowliga ah;
c) Isticmaalka gaadiidka dadweynaha iyo xamuulka.

**Qod. 8**

Ciddii ka hortimaada amaradda halkaan ku xusan, ama falka uu geeystay uusan ahayn fal dembi (sida ku cad qodobka 6) ama uusan ahayn fal dembi kasi culus wuxuu muteysan doonaa ganaax ilaa So 800 ama xarig ilaa 3 bilood .

**Qod. 9**

Maamuluhu wuxuu dekreeto ku soo saari doonaa xeerarka dheeradka ah ee fulinta amar-sharcigaan.

**Qod. 10**

Waxaa la buriyey Baaqyada lamba. 2 ee 1942 iyo lamba. 24 ee 1943 iyo aar-shargia 1944 ee la xiriira badeecada la soo geliyo dalka iyo sharci kasto oo ka soo horjeeda Amar- Sharcigaan.

Muqdisho, 10 Maarso 1953.

Maamulaha Guud

**E. Martino**

Waa la arkay waana la diwaan geliyey lamba. 1094 RD

11 Maarso 1953